



Shoog-ka-qaadista dhaqanka

Markii aad ka tagto waddankaaga oo aad u safarto waddan cusub, dabiiciyan waxaad wadataa shaqsiyadaadda iyo siyaabahaad u dhaqanto. Markaad timaaddo waddanka cusub oo leh dhaqan duwan waxaad la kulmi kartaa dareemo iyo falcelisyo kala duwan. Tusaale ahaan, waxaad dareemi kartaa inaad buuqsan tahay, xanaaqsan tahay, caroonayso, waxba hubin aadna ku tiirsan tahay dadka kale. Haddii aad la kulanto waxyaalahaas, markaas waxaad qabtaa

Shoog-ka-qaadista dhaqanka.

Shoog-ka-qaadista dhaqanka waa falcelis caadi ah ayadoo badiba dadku ula kulmaan si ama si kale markay yimaadaan Australia. Xusuusnow, dad badan oo Australia ah inay ku dhasheen dibadda. Dadkan Australianka ah waxay ka kala yimaadeen ugu yaraan 200 waddan oo adduunka daafihiisa ah. Ma tihid imaadaha-cusub oo ugu horreeyey keligaana ma tihid.

La-qabsiga shoog-ka-qaadista dhaqanka waxay u baahan tahay dadaal gaar ah, hase ahaatee waxaa muhiim ah in la xusuusto inaad keligaa ku ahayn dareenkaaga walaaca ah. Badiba dadku asbuucyada iyo bilaha ugu horreeya ee waddanka cusub waxay la kulmaan falcelis isla-mid ah – waa falcelin caadi ah ee isbaddallada waaweyn oo ku dhaca beya'dda jidhkaaga, bulshadaada iyo dhaqankaaga.

Badanaa waxaa jira afar weji oo Shoog-ka-qaadista dhaqanka. Adigoo fahma arintaas, waxaad awoodi doontaa inaad si fiican u maareyso dareenadaada iyo waayo-aragnimooyinkaaga.

Wejiga 1aad: Shahrul-Casalka (euphoria): Markaad timaado Australia waxaad qabi kartaa rajooyin sarsare iyo filansho weyn. Wax kastaa waa ku soo-jiidanayaan waana kuu cajiib adiga.


Wejiga 2aad: Shoog-ka-qaadista dhaqanka/Shiddada (niyad-jabka): Waxaad lugaha la gashay dhibaatooyin la-taban karo, sida guri-siinta iyo shaqo-helidda ama isku qoridda fasallada Ingiriisiga ah. Dareemada waxaa ka mid ah rajo-xumada, niyad-jabka, yaxyaxa, cabsida, carada, dambi-qabidda, hilowga, xannaaqa ama buufiska. Waxaad kaloo kugu dhici kara hurdo-la'aan, daal, rabitaan la'aanta cuntada iyo wax aadan ku niyad fiicnayn.

Wejiga 3aad: La-qabsiga (Bogsoodka): Waxaad bilaabaysaa inaad dareento inaad aad isku kontaroolayso maaddaama uu Ingiriisigaagii soo hagaagayo aadna waayo-aragnimo badan ka heshay Australia. Waxaad kaloo qabi kartaa ka-daahsoonaan iyo shaki-qabid. Rajooyinkaagii si fudud looma helin.

Wejiga 4aad: Hanasho (Laba-dhaqan): Howlo joogto ah ayaa samaysmey. Waxaad aad ula qabsatay luqadda, caadooyinka, kastamada, cuntada iyo dadka waddankaaga cusub. Waxaad dareemaysaa raaxo badan waadna aqbalaysaa Australia inay tahay waddankaagii. Waxay qaadan kartaa shan sano ama ka badan inaad marxaladdaas gaarto. Iska adkayso waxaadna xusuusataa inaad keligaa ahayn.

Qaabka qallooca-U ee la-qabsiga Dhaqanka ajnabiga

Heerka la-qabsiga



Qof kastaa wuu ku faanaa oo ku raaxaystaa asalka dhaqankooda. Adoo leh maskax furan iyo ka-warqab waxaad baran kartaa inaad ixtiraamto oo raali ka noqoto bulshada Australia iyo sidoo kale inaad la wadaagto dhaqankaaga dadka Australian-ka ah. Hoos waxaa ku yaalla liiska talo-kasoo-jeedinta siyaabaha loola qabsado xalladdaada cusub.

Dhagayso, una fiirso oo noqo mid maskax furan

Waxaa laga yaabaa inaad la socon xeerarka mujtamaca ee Australia. Isku-day inaad si taxadar leh u-dhagaysato waxa dadku oranayo una fiirso luqadda jidhkoodu bixinayo. Waxaad baran doontaa sidaad ugula hadli lahayd af ahaan iyo si aan af ahayn oo qaabab habboon ah.

Weydii su'aalo

Is-weydii haddii dhaqanka aad arkayso macno ka samaynayo dhaqanka Australia, xataa haddii ay u muuqato mid qariib ama qalad kula ah. Haddii aad aragto ama aad la kulantu wax aadan garanayn, xusuusnow, inay tahay sababtoo ah inaad haysan macluumaad kugu filan. Weydii su'aalo cid aad ku kalsoon tahay. Qofka Caseworker-kaaga ayaa badanaa ku caawinaya, ama waxay kuu diri karaan cid ku caawin karta.

Hayso dareenkaaga himadda ah

Waa suurtagal inaad qaladyo samaysid isla markii aad barato dhaqankaaga cusub. Haddii aad awooddo inaad ku qososho waxyaalahan qaldan qarkood waxay kugu caawin doontaa inaad barato, la-qabsato ama aad ku raaxaysato guud ahaan waayo-aragnimada.

Walaaca iyo niyad-jabka

Barashada in si firfircoon looga shaqeeyo dhaqanka cusub ma fududa. Macnayaasha xaaladaha dhaqannada is-dhexgala mararka qaarkood ma cadda. Xaaladahan oo kale, waa iska caadi in la dareemo walaac iyo niyad-jab. Haddii aad u-garato in dareemadaas ay qayb caadi ah ka yihiin waayo-aragnimadaada dejinta, waxaad awoodi doontaa inaad si fiican ula tacaasho.

Ka-qaybgalka howlaha bulshadaada

Waxaa ku jira qiimo weyn in la barto oo la garto habka cusub ee nolosha oo ka jirta dhaqan ka duwan kaaga. Isku-day inaad da'daal ku bixiso inaad dadka la kulantu aad ka qaybgasho bulshadaada. Taasi waxay kugu caawinaysaa inaad wax ka barato Australia aadna la-qaybsato dhaqankaaga dadka Australia. Soo bax, folanteeri noqo iskuna mashquuli nashaadyada bulshada.

Ka-qaybqaado howlaha horumarinaya rajooyinkaaga mustaqbalka wanaagsan

Isku-day inaad u-aragto muddada hore inay tahay hal weji oo noloshaada ah – iyo bilowga rajooyinkaaga mustaqbalka wanaagsan. Imow fasallada luqadda ah. Fasalladan waxay bixiyaan wax ka badan luqadda; waxay bixiyaan la-qabsiga bulshadaada iyo qabka-nafta oo hagaaga.

Si joogto ah u-samee wax adiga kuu gaar ah

Bal xoogaa layli ah qaado. Soo-bax oo socod samee, orod ama baaskiil fuul. La-kulan saaxiibadaa. La-soo-bax hiwaayad hore ama bilow waxaad mar kasta jeceshahay inaad samayso hase ahaatee aadan helin fursadda aad ku samayso, tusaale ahaan, beeridda jardiinka qudaarta, barashada sida loogu ciyaaro aaladda muusikada, rinjiyeynta ama baro sida loo cayaaro cayaaraha.

